
HAGAHA AKHRISTAHA

Reader guide

Akhristaha maanta waa hoggaamiyaha berri



W/Q: Cabdiraxmaan Caqiil

HAGAHA AKHRISTAHA

Akhristaha maanta waa hoggaamiyaha berri

W/Q: Cabdiraxmaan caqiil

Mahadnaq

Mahad oo idil waxay u sugnaatay Allaah, intaa kadib waxaan halkan uga mahadcelinayaa cid kasta oo ka qaybqaadatay soo saarista buuggan, waxaan si gaar ah halkan uga mahadcelinayaa ustaad Cabdifataax Maxamed oo kaalin mug leh ka qaatay dib u habaynta iyo tifaftirka buuggan, sidoo kale saaxibada aragti iyo fikir ila garabtaagnaa waa ay ku mahadsanyihiin..

Hibayn

Buuggan waxaan u hibaynayaa waalidiintaya,maclimiintayda, iyo guud ahaan da'yarta soomaaliyeed ee xiisaynaysa Akhriska, waxaan u hibaynayaa jiilka hadda soo koraya, waxaan u hibaynayaa ardayda dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare, waxaan u hibaynayaa ardayda jaamacadaha, waxaan u hibaynayaa ubaxa dalka, waxaan u hibaynayaa inta waqtigooda ka faa'idaysata, waxaan u hibaynayaa adiga hadda akhrinaya iyo cid kasta oo akhrida buuggan

Afeef

Waxaa laga yaaba in meelaha qaar ee buugga uu khalad ka jiri karo , innagu waxaan nahay insaan ilowshiyo badan, haddaba waxaan idinka codsanayaa in meeshii khalad ka jiro la ila socodsiiyo si aan dib u sixid ugu sameeyo.FG:Buuggan waxaa u furan qof kasta inuu la wadaago bulshada, iyada oo aan waxba lagu darin, waxna laga dhimin, ujeedkayga ugu weyn waa in la helo bulsho wax akhrinaysa.

Tusmada Buugga

Mahadcelin.....2
Hibayn..... .....2.
Afeef..... 2
Hordhac..... 4
Qeexitaanka Akhriska..... 5
Caalamka Akhriska..... 5
Taariikhda Akhriska..... 6
Ahmiyadda Akhriska..... 7
Soomaalida iyo Akhriska..... 9
Hadafka wax loo akhriyo..... 10
Heerarka Akhriska..... 11
Doorashada buugaagta..... 12
Noocyada
buugaagta 12
Sidee wax loo akhriyaa..... 17
Naadiyada Akhriska..... 20
Buugaagta la
dhegaysto(podcast)..... 21
Caruurta iyo Akhriska..... 24
Akhriska muxuu noloshayda ka badalay..... 25
Maktabadaha laga helo
buugaagta..... 27
Maxaa laga yiri Akhriska..... 18
Tixraacyo..... .....29s

Hordhac

Akhrisku waa isha aqoonta, quudiyaha maanka iyo maskaxda, waxaa laga dhaxlaa in macluumaad badan la helo, Waxay nagu caawisaa inaan curino wax cusub, Umadaha horumaray waxay dhaqan u leeyihiin in ay wax akhriyaan, Umadaha dunida hogaamiya waa kuwo wax akhriya.

Akhrisku waa mid kamid ah farsamooyinka ugu muhiimsan ee laga rabo insaanka inuu barto si uu dunida u la jaanqaado, marar badan ayaad maqlaysaa " Akhristaha maanta Waa hoggaamiyaha berri" Anaga oo sidaas u og hadana wax akhriskeenna aad buu u yaryahay marka loo eego bulshooyinka kale.

"Haddii aad doonayso inaad ka weynaato da'daada wax akhri" buugaagta waxaad ka helaysaa tijaabooyin iyo farsamooyin horay loo soo maray, dad qarniyo fog ka hor noolaa ayaad la sheekaysanaysaa, waxaa sare u kacaya hab-fikirkaaga, garaadkaaguna wuu kobcayaa, balse waxay u baahantahay sabir, dulqaad, dhabar-adayg, adkaysi, tacab iyo dadaal aan yaraan.

Diinteenna islaamka waxay nagu dhiirigelisay inaan wax akhriyo, sababtoo ah suuraddii ugu horaysay ee lagu soo dejiyay nabigeenna Muxammad sallalaahu calayhi wasallam waxay ahayd IQRA oo micneheedu yahay " Akhri", sidoo kale Qur'aanka waxaa uu noo bidhaamiyay Ahmiyadda aqoonta ay bulshada u leedahay, muslimiintii hore waxay cilmiga baran jireen caruurnimada ilaa qabriga ay ka galaan, Waxay ku dadaaleen Akhriska, waxayna horumariyeen dunida waqtigii ay joogeen.

Haddaba dhiganahan waxaad ku baran doontaa micnaha guud ee akhriska qaabka wax loo akhriyo, sida looga faa'idaysan karo buugaagta, noocyada buugaagta, hadafka wax loo akhriyo, Soomaalida iyo akhriska, umaddaha horumaray iyo akhriska.

Cabdiraxmaan Caqiil

Baydhabo----Soomaaliya

July 2021

Qeexitaanka Akhriska

Akhrisku: waa ku dhawaaqidda wax qoran

Qaamuuska afka Soomaaliga Dr cabdalla cumar uu qoray wuxuu ku qeexayaa micnaha Akhris: Erayo ama weedho qoran daalacasho ama kor ugu dhawaaqid.

Akhrisku waa daalacasho iyo fahamka wax qoran ama daabacan. Merriam Webster Dictionary

Akhrisku waa ku dhawaaqidda erayo qoran ama daabacan. Cambridge Dictionary

Akhrisku waa fahamka iyo garashada micno, warbixin, iyo Xaalad qoran. Cambridge Dictionary

Marka aad akhrido shay sida buug, ama qodob, oo aad daalacato si fiicanna u fahanto waxa qoran waxaa loo yaqaanaa Akhris. Collins Dictionary

Akhrisku waa habka loo dhuuxo dhigane ama ereyo meel ku dhigan loona dhugto nuxurka ku dheehan. Qeexitaankan waxaan ka soo minguuriyay Aadan Sahan.

Caalamka Akhriska

Akhriska waxaa lagu tiriyaa waxyaabaha ay isdheeryihiin aadanaha, waa halka looga qiyaas qaato mujtamaca horumaray iyo kuwa dib u dhacay.

Markaan Akhriska ka hadlayo micnaheedu ma ahan in qofku yaqaano sida wax loo akhriyo, balse waa inuu qofku jecelyahay Akhriska.

Umadaha kuma horumaraan kheyraadka ay leeyihiin ama in ay leeyihiin kaabayaal dhaqaale, umad kasta waxay ku horumartaa insaan diyaaarsan oo fekeraya, insaan maskaxdiisu deggantahay, insaanku waa raasamaalka dhabta ah ee bulsho, haddii horumar lagu gaari lahaa kheyraad badan(Resources) maanta soomaalida cid ka barwaaqo badan miyay jiri lahayd? Umad ilaahay ku manaystay Xeebta ugu dheer Afrika, dhulbeereed aan la qiyaasi karin, Macdan, shidaal iyo dahab dhulkoodu buuxo hadana aan marna laga faa'idaysan, dhibta jirta ayaa ah in dadkii ka faa'idaysan lahaa kheyraadkaas, dadkii Akhrin lahaa aqoonta iyo waxyaabaha khuseeya ay mashquul ku yihiin meelo aan loo dirsan, waxaan rajaynayaa in jiil dhisan u soo bixi doono dalkeenna.

Caalamka Akhriska waa duni guda ballaaran mana jirto xuduud iyo goob ku eg, waxaa dunida ku soo badanaya dadaaladda lagu doonayo in lasoo saaro bulsho wax akhrisa, illayn waa casriga cilmiga iyo macluumaadka, Farqi weyn ayaa u dhaxeeya mutacalimka iyo aqoonyahanka, aqoonyahanku waa qofka wax akhriya, wax baarbaara, waa kan akhriska ka dhiga qayb noloshiisa kamid ah, halka

mutacalimka ama qofka waxbartay uu ka fekero helitaanka shahaadada jaamacadda dhib weyn kuma hayso inuu wax badan korodhsado.

Haddaba bulshada waxaa la gudboon in ay ku soo biiraan caalamkan gaar ahaan ardayda ku jirta waxbarashada, waa inaad wax badan ka akhridaa takhasuskaaga jaamacadeed iyo culuumta aad xiisaynayso, dhakhtar wanaagsan waxaad ku noqon inaad wax badan ka akhrido dhakhtarnimada, dhaqaale-yahan sare waxaad ku noqon inaad wax badan ka akhrido dhaqaalaha iyo kuliyadaha kale.

Taariikhda Akhriska

Waxaa la sheegaa in Akhriska insaanka uu soo bilowday waqti aad u fog, qoraaga buugga "The history of reading" waxaa uu daaha ka rogayaa marxaladaha uu soo maray Akhriska, xilliyadii dhagaxaanta iyo looxaanta la isticmaali jiray ayaa kamid ah xilligii wax akhrisku jiray.

Haddaan dib u milicsano taariikhda nabiyada waxaan la soconaa in nabi Suleymaan Calayhi salaam uu fariin u diray boqortooyadii Saba' ee ka jirtay dalka Yemen.

Sidoo kale falaasifada Giriigii hore ayaa la sheegaa in ay akhriska ku dadaali jireen, qarniyaddii hore meelaha xadaaradaha bani aadamka ka jiray waxaa kamid ahaa dhulkii Baabil (dalka ciraaq), waxaa jira qoraallo badan oo ay diyaariyeen dadkii reer Baabil oo xilligaasi hogaanka u hayay ilbaxnimada insaanka, qarniyaddii dhexe jasiiradda carabta waxaa ka soo ifbaxay muslimiinta waxayna muddo kooban gudaheeda kula wareegeen xadaaraddii insaanka, saxaabada nabiga NNKH waxay ku dadaaleen qorista axaadiista laga weriyay nabiga NNKH, xilliyadii ka dambeeyay waxaa soo shaacbaxay qorista gabayada, xikmadaha, iyo funuunta kala duwan casrigaasi waxa uu ahaa xilligii Akhriska iyo qoraalka, maktabaddii magaalada Qurduba ee wadankii Andalus(Isbayn&Bortuqal) waxay qayb ka ahayd maktabadihii ugu weynaa ee jiray casrigii dhexe, buugaagta laga heli jiray waxay gaareen 400,000 (Afar boqol oo kun) oo buug, waxaana xusid mudan in xilligaasi aanay jirin madbacada lagu daabaco buugaagta balse buugaagta waxaa lagu qori jiray gacanta.

Xadaaraddii shiinaha waxay geedaha ka sameeyeen warqad wax lagu qoro sanadkii 105 miilaadi, xilligaas ka hor waxay isticmaali jireen dhagaxaanta si wax loogu qoro, waxayna shiinuhu si weyn u qori jireen buugaagta ka hadla Beeraha iyo dhismaha magaalooyinka, sidoo kale xisaabta,caafimaadka ayay wax badan ka qoreen. Xadaaraddii Roomanka ayaa kaalin weyn kulahayd qorista buugaagta juqraafiga, khariidooyinka, badmaaxnimada, iwm. Qoraaga reer Taliyaani Caius Plinius Secondus ayaa qoray mid kamid ah buugaagta ugu caansan Taliyaaniga,

wuxuuna u bixiyay " Historia Naturalis" sidoo kale waxaa uu qoray 37 buug oo isugu jira Taariikhda Roma, suugaan, iyo kuwo kale, xadaaraddii Beershiya qarnigii seddexaad ee miilaadiga waxay wax ka qoreen maamulka, iyo siyaasadda, waxaa jira buug ay qoreen Beershiyiinta oo lagu magacaabo " Beeralayda iyo shaqaalaha" oo ah buug si weyn looga qadariyo Iran. Xadaaraddii Hindida waxay xoogga saareen culuumta cirka, aljabrada iyo xisaabta, kimistiriga, caafimaadka, iwm. Masaaridii hore waxay qayb ka ahaayeen Umadaha ku horumaray Akhriska, waxaa la sheegaa in ay ikhtiraaceen ama soo saareen warqad wax lagu qoro, inkastoo arintan dood ka taagantahay, Waxay wax badan ka qoreen injineeriyadda, xisaabaadka, iyo qorshaynta.

Qarniyadan dambe waxaa sii batay xiriirka dadka iyo buugaagta ka dhaxeeya, iyada oo dunida isu furantay, waxaa la helay madbacado, maktabado waaweyn, iyo sidoo kale aaladaha Elektarooniga, waxaa fududaatay helitaanka buugaagta, waxaa la helay internet oo si fudud looga soo dejin karo buugaag badan kadibna si fudud loo daabacan karo iyada oo aan safar dheer la galin.

Innaga ka soomaali ahaan hadalkeenna ayaa ka badan inta aan akhrido, halkii laga rabay inaan camirno maktabadaha waxaan camirnay makhaayadaha iyo goobaha fadhi-kudirirka, haddana rajo kale ayaan arkayaa, bandhigyada buugaagta ayaa ku soo badanaya magaalooyinkeenna.

Ahmiyadda Akhriska

Faylasuufkii faransiiska ahaa ee Voltaire oo noolaa intii u dhexaysay(1694-1778) waxaa maalin la weydiiyay su'aal ahayd

Yaa hogaamin doona insaanka?

Wuxuu ku jawaabay kuwa yaqaana sida wax loo akhriyo.

Akhrisku waa mid kamid ah qaababka uu qofku uga faa'idaysan karo maskaxdiisa, maskaxda Alle noogu deeqay waa in lagu fekeraa wax cusubna la curiyaa, Akhrisku waxaad ka helaysaa macluumaad tiro badan taasi oo kordhinaysa garaadkaaga iyo wacyigaaga.

Akhrisku waxaad ka helaysaa wax cusub oo aadan horay u aqoon, culuum kala duwan, farsamooyin badan oo ku anfacaya mustaqbalka, sidoo kale taariikhda bulshooyinkii hore ayaad ka faa'idaysaa.

Akhrisku wuxuu gebi ahaan badalayaa qaab nololeedkaaga, hab-fikirkaaga, iyo aragtiyo badan oo kaa dhaadhacsanaa, dabeecadahaaga ayaa isbedel ku dhacaya, halkii aad dagaal iyo gacan-kahadal ku xalin jirtay waxaad ku xalinaysaa fikir dheer iyo caqli.

Akhriska waxaa laga dhaxlaa indheer-garadnimo, micnaha indheer-garad waa qof wax badan og, dabcan buugaag badan ayaad akhriday waxaad akhriday dad qarniyo ka hor noolaa, dad wax badan nolosha ku soo arkay, waxaad akhrinaysaa tijaabooyin horay loo sameeyay, waxaad sidaas ku noqonaysaa indheer-garad, inaad laba maalmood buug akhrido taasi kama dhigna indheer-garadnimo, waa inaad caado ka dhigataa Akhriska sanado badan aad wax akhrido.

Allaah Subxaanah watacaalaa Wuxuu ku dhaartay qalinka, sidoo kale aayadihii ugu horeeyay ee ku soo dega nabiga NNKH waxay ahaayeen Akhriska iyo aqoonta,taasi waxay na tusaysaa Ahmiyadda Akhriska ay leedahay.

Umadda wax akhrida waa umad kor u socota, maanta Umadaha kor u kacoodu iyo hoos u dhacoodu waxaa lagu qiimeeyaa umadda iyo inta ay wax akhrido, waxaa la sheegaa in wadamada qaar aan laga helin cid aan wax akhrin karin, umaddaha waxay u kala horumaraan sida ay u maalgashadaan Akhriska iyo qoraalka.

Haddii cuntadu jirka quudiso, wax Akhrisku waxaa uu quud u yahay maskaxda, waa waxyaabaha kobciya garaadka.

Akhrisku waa ka xuroobidda jahliga, marka aad wax akhrido waxaa ku dhaafaya meel aad jaahil ka ahayd islamarkaana wax cusub oo aadan garanayn ayaad korodhsanaysaa.

Waa daaqad kaaga furmaysa caqliyada bani'aadamka, waxaad akhrinaysaa wixii ugu qiimaha badnaa ee insaan ka tagay.

Cimriga insaanka waa uu koobanyahay, haddii uu qofku wax akhriyo waxaa kordhiya da'diisa iyo khibradiisa, waayo waxaad saacado ku akhrinaysaa tijaabooyin tobanaan sano lasoo samaynayay oo buug lagu diyaariyay.

Qofka wax akhrrinaya wuxuu la sheekaystaa ragii ugu caqliga badnaa ee dunida soo maray, waxaad maktabadaha ka helaysaa buugaag ay qoreen imaam shaafici, Newton, ibnu khulduun, marka aad akhrinayso buugaagta ay qoreen waxaad moodaa in aad hadda la fadhido oo aad la sheekaysanayso.

Akhrisku xuduud iyo xayndaab malahan, wixii aad u baahato inta badan waxaad ka helaysaa buugaagta, halka qarniyaddii hore cilmiga laga raadsan jiray dad meelo fogfog ku sugan, balse maanta waxaan fursad u helnay buug kasta aan u baahano inaan helno.

soomaalida iyo Akhriska

Bulshada soomaaliyeed ee degta geeska Afrika waxay leedahay xadaarad iyo sooyaal guda ballaaran, waa mid kamid ah bulshooyinka ugu ilbaxsan geeska Afrika.

Soomaalida qarniyaddii dhexe waxay caan ku ahaayeen tirinta suugaanta, gabayada, iwm.

Qarnigii 20aad ee la qoray farta soomaaliga waxa uu ahaa qarni ay soomaalida u kacday Akhris iyo qoraal, waxaa xilligaasi la bilaabay ololihii reer miyiga lagu barayay farta soomaaliga iyo sida wax loo qoro, dhalintii ku jirtay dugsiyadda ayaa kaalin mug leh ka ciyaaray ololahaasi.

Sanadihii todobaatanaadkii waxaa soo ifbaxay buugaag badan oo ku qoran afka Soomaaliga, sidoo kale waxaa dalka ka hanaqaaday wargaysyo ku qoran afka Soomaaliga markii ugu horaysay taariikhda, heerka wax akhris ee bulshada soomaalida xilligaasi meel fiican ayuu marayay, aqoonyahankii joogay waqtigaasi waxay bulshada ku booriyeen in ay wax badan akhriyaan.

Waxaa daaha laga rogay buugaag taariikhda galay, sheekooyin si farshaxmaysan loo diyaariyay iyo sidoo kale buugaagta manaahijta dugsiyadda oo loo badalay afka Soomaaliga, dadaaladaasi waxay sare u qaadeen heerka garaadka soomaalida waqtigaasi joogay.

Balse maanta iftiinkaasi wuu qarsoomay, sanado badan oo dib u dhac iyo dagaallo ayaa la soo maray, horumar sidaas u buuranna ma muuqdo oo laamiyaddii sideetankii la dhisay ayaa weli sidooda u taagan, da'yartii mustaqbalka u ahayd dalka qaarna waxay mashquul ku yihiin barahaa bulshada, qaarna daroogo iyo qaad, qaar kale fadhi-kudiriryada iyo qabiilada ayay waqtigooda ku qaadanayaan, inta yar ee soo hadhay ayaa wax akhrisa waxna qorta, si intaas looga baxo waxaa habboon in la qaato 2 qodob.

▪Dhalintu waa in ay dhisaan heerkooda aqooneed, waa inay waqti geliyaan daalacashada kutubta, waa in ay sameeyaan cilmi-baaris.

▪Tignoolajiyadda waxay ku faaftay degmo ilaa tuulo, waxaa habboon in la xakameeyo adeegsiga barnaamijyadda qaar oo dhalinta waqtiga kaga luma.

Si loo helo mujtamac fekeraya oo garaadkiisu kobcay waa in barayaasha dugsiyada, iyo waalidiinta ay iska kaashadaan in lagu dhiirigeliyo jiilkan wax akhriska.

Hadafka iyo Ujeedka wax loo akhriyo

Akhrisku waa aqoon, garasho, khibrad, iyo fan qurxoon, taasi kama dhigna in sidaas lagu tirtiray jahliga, balse waxaan buugaagta u akhrinaa inaan fekerno, wax fahamno, wax curino, horumar ku gaarno, iyo inaan waqtiyadeenna firaaqada ah aan ku buuxino wax faa'ido inoo leh, aqoontii dunida waxay kusoo uruurtay warqadaha, casrigan qofkii yaqaana sida wax loo akhriyo waxaa uu haystaa fursad qaali ah uu ku baran karo qaybaha kala duwan ee aqoonta, haddaba dhowr ujeedo ayaa wax loo akhriyaa, waxaana kamid ah:

▪In wax cusub la barto: barashada wax cusub waxay muhiim u tahay nolosha insaanka, ma qurux badna inaad maalin kasta hal meel taagnaato, maalin kasta oo ku soo marta waa inaad ugu yaraan hal shay barataa, haddii kale macluumaad duugoobay baad la daaladhici doontaa, waa inaad wax baartaa oo wax diraasaysaa, waa inaad kaligaaga wax isbari kartaa waana taas waxbarashada rasmiga ah.

▪In la fakaro: maskaxdu waa xubinta ugu firfircoon jirka bani'aadamka, dadku wax bay Cunaan, cabaan, wayna hurdaan, sidoo kale xooluhu way cunaan oo cabaan, haddaba waxaa uu dheeryahay maskax laga rabo inuu ku fekero, baaritaano badan oo la sameeyay waxaa lagu ogaaday in dadka Akhriska badan ay fakaraan, waxaa intaas u dheer inay hal-abuur badan samayn karaan dadkaasi, sidoo kale maskaxdoodu ay ka shaqo badantahay kuwa aan wax akhrin misna fakarin.

▪In waqtiyada firaaqada lagu buuxiyo: Waxaa jirta maahmaah carbeed oo tidhaahda: "Waqtigu waa sida seefta, haddii aadan goyn wuu ku goyn" taas oo la micno ah in waqtigu uu qayb ka yahay cimrigeenna waxa aan ku buuxino ha noqdaan wax mirodhal ah, dadka qaar waqtiyada firaaqada waxay ku badiyaan akhrinta sheeko faneedyada Qisooyinka dhaadheer, iyo taariikhda quruumihii tagay.

▪Ujeedo shaqo: Waa qayb kamid ah akhristayaasha, qaybtan waxay qaybihii hore uga duwantahay in akhristuhu uu si gaar ah ugu dadaalo akhrinta takhasuskiisa ama xirfadda uu doonayo inuu mustaqbalka ku shaqaysto, haddii uu shaqaale yahayna wuxuu xoogga saaraa horumarinta iyo sare u qaadidda shirkaddiisa ama goobtiisa shaqo.

▪Ujeedo Horumarin: Qof kasta oo naga mid ah waxa uu leeyahay mawhibo ama wax isaga u gaar ah oo uu ku fiicanyahay ama xiiseeyo, in qofku wax badan ka akhriyo mawhibadiisa waxay sare u qaadaysaa kalsoonida nafeed ee qofka.

▪Ujeedo Waaqici ah: Xaaladaha qofka lasoo gudboonaada waxay dadka qaar ku taliyaan in buug laga akhriyo si xalkeeda loo helo, tusaale qof u baahan inuu guursado waa in uu akhriyaa buugaagta guurka ka waramaya.

Heerarka Akhriska

Waxaa suurtagal ah inaad isweydiiso waxa looga jeedo kalmadan, balse inyar ila soco, caruurta yaryar markii soo gaaraan da'da toddobo, ama sideed waxaa la geeyaa malcaamadda Qur'aanka lagu barto, bilooyin kooban kadib ilmaha yar waxaa uu bilaabayay inuu wax qori karo waxna akhrin karo haddana waxaa ka dhaca khaladaad yaryar, muddo kadib waxaa uu awood u yeeshaa inuu si fiican ula jaanqaado qorista iyo akhrinta, muddo kadib waxaa la geeyaa dugsi lagu barto afafka Sida carabiga iyo English-ka, Haddaba wuxuu markan xooggiisa isugu geeyaa inuu si fiican u barto Luuqadda.

Akhrisku waxa uu leeyahay heerar kala duwan, waxaana ugu muhiimsan:

▪Heerka koowaad: Akhrinta bilowga ah, Waxaa maalinba maalinta ka dambaysa soo badanaya dadka daneeya Akhriska, waxaana la filayaa in sanadaha soo socda ay dad badan bilaabi doonaan Akhriska, waxaa jira dadaalo badan oo ay sameeyaan waalidiinta si ubadkooda ay u bartaan akhriska, waxaa soo badanaya caruurta ku biiraysa dugsiyada, mujtamaca inbadan oo kamid ah ayaa awooda in ay wax akhriyaan, qaybtan waxay koobsanaysaa in dadka aan Akhriska aqoon ay bartaan sida wax loo akhriyo.

▪Heerka labaad: Akhrin baaris la socota, qaybtan waxay kulminaysaa akhrinta bilowga ah iyo qayb kaloo cusub, marka hore waxaa muhiim ah inaad su'aashan ka jawaabto, buuggan aan doortay ma yahay mid ku habboon in la akhriyo waqtina la geliyo?, si fiican u eeg jeldiga buugga, kadib horudhaca buugga si mug leh u dhuux, intaa kadib waxaad akhrinaysaa ujeedka loo qoray buugga, mowduuca uu ka waramayo, kadib tusmada buugga iyo tirsiga mowduucyada muhiimka ah, tallaabooyinkan waxay kaa caawinayaan inaad si mug leh u garato waxa uu ku saabsanyahay buugga, intaa kadib kusoo laabo fasalada ama qaybaha uu ka koobanyahay buugga, intii aad muhiim u aragto ka akhri, ugu dambayn ha illoobin inaad akhrido 5 ta warqadood ama gebagabada buugga.

▪Heerka seddexaad: Dedejinta Akhriska, haddii aad doonayso inaad buugga waqti kooban ku akhrido qaybtan saamayn bay kugu leedahay, waxaad akhrinaysaa buugga billow ilaa dhamaad adiga oo aan ku hakan kalmad kugu adkaatay ama qaamuus la aadin ayaad ka gudbaysaa si aad waqti fiican u dhamayso.

▪Heerka Afaraad: Waa dhugashada wixii aad akhrido, waa akhrinta buugga si deggan iyada oo ay la socoto inyar oo dedejin ah waxaa uu akhristuhu awood u yeelan karaa in uu fahmo ujeedka qoraaga si guud.

▪Heerka Shanaad: Akhrin xeeldheer: Waa Akhrinta buugga si guudmar ah, kadibna si qoto dheer loo akhriyo qaybaha (parts) uu ka koobanyahay buugga, ujeedkuna waa fahamka waxa ku qoran buugga iyo ka faa'idaysigiisa, waana heerka ugu sarreeya heerarka shanta ah.

Sidee loo noqdaa Akhriste wanaagsan?

Markasta qofka hankiisu sarreeyo waa qof go'aan leh naftiisana ka adag, samayso qorshe macquul ah oo aad adeegsan karto markasta, saaxibo akhriska jecel inaad yeelato waa lagama maarmaan, ugu dambayn ku xidhnaanshaha Allaah waa furaha wax kasta aad doonayso inaad gaadho, hagaaji xidhiidhka kaala dhaxeeya Rabigaaga.

Doorashada Buugaagta

Waxaa muhiim ah inaad garato nooca buug aad xiisaynayso, Luuqadda aad wax ku akhrin karto iyo heerkaaga fahan ee luuqaddaasi, fariimaha ay gudbinayaan buugaagta taariikhda ama kuwa falsafadda waa mid ka duwan buugaagta sheekooyinka ama kuwa cilmiga ah, inta aadan akhrin ka hor buugga ama waad soo iibsatay ama maktabadda ayaad ka soo qaadatay kadib markii uu kusoo jiitay magaca buugga sow sidaa maaha?, waxaa jira dad muddo akhrinayay buug haddana aan waxba ka fahmin, laga yaaba in buug heerkoodu aan gaadhsiisnayn akhriyeen, haddaba isweydii su'aashan.

Maxaan Akhriyaa?

Waxaa jira noocyo kala duwan oo buugaag ah, funuun tiro badan ayaa la akhriyaa maanta , waxaana kamid ah:Buugaata diiniga ah dhiirigelinta, Taariikhda, siyaasadda,juqraafiga cilmu nafsiga, dhaqamada, kobcinta garaadka, sheekooyinka, gabayada, luuqadaha, tarbiyaynta ubadka, dhaqaalaha, tignoolajiyadda, caafimaadka, falsafadda, horumarinta nafta,farshaxanka xikmadaha, iwm.

Kutubta Diiniga ah: diinteennu waa Islaam, waxaa waajib nagu ah barashadeeda iyo ku dhaqankeeda, camal wanaagsan iyo cibaado suuban in la la yimaado ayaa loo baahanyahay, haddaba kutubta ugu muhiimsan ee diiniga ah waxaa kamid ah:

•Tafsiirka Qur'aanka: Waa fahamka micnaha aayadaha Qur'aanka, kutubta tafsiirka waxaa kamid ah: Tafsiirka ibnu Kathiir,Tafsiirka jalaalaynka.

•Tajwiidka: Waa barashada qaabka loo akhriyo Qur'aanka iyo sixitaanka khaladaadka luuqadeed ee uu qofku ku dhaco.

•Naxwaha: Waa cilmi guda ballaaran, waxa uu kuu sahlayaa inaad si fiican ugu hadasho afka carabiga.

•Sarfaha iyo balaaqada: Waa qayb kaloo muhiim ah oo ka tirsan Luuqadda carabiga.

•Towxiidka: Waa qayb loo baahanyahay Qof kasta oo Muslim ah barashadiisa.

•Axaadiista: Waa axaadiista laga weriyay nabigeenna Muxammad sallalaahu calayhi wasallam, waxaan ka baranaa dhaqankii suubanaa ee nabiga NNKH.

•Fiqhiga: Waa axkaamtii uu jideeyay Allaah Subxaanh watacaalaa ee kusoo arooray Qur'aanka kariimka iyo axaadiista nabiga Nabadgalyo iyo naxriis korkiisa ha ahaato.

•Siirada nabiga sallalaahu calayhi wasallam: Waxaa laga bartaa qaab nololeedkii nabiga, iyo sida uu u tarbiyeeyay saxaabadiisa.

•Qisooyinkii nabiyada.

•Qisooyinka Qur'aanka: Waa qisooyinkii uu Allaah noogu sheegay Qur'aanka ee ka sheekaynaya umadihii hore, wixii soo maray, iyo dhacdooyin taariikheed.

Buugaagta dhiirigelinta (Motivation)

Dhiirigelintu waa dhaqaajinta nafta si loo qabto hawl ama shaqo, dhiirigelintu waa laba nooc oo kala ah mid gudaha katimaada iyo mid dibadda ah,

Dhiirigelinta gudaha waa in qofku iskiisa u go'aansado in uu noloshiisa horumariyo ama wax ka badalo, halka dhiirigelinta dibadda ay ka timaado dadka kugu xeeran,mediyaha, buugaagta, iwm.

Ahmiyadda Buugaagta dhiirigelinta

▪ Waxaad ka helaysaa tamar iyo awood maskaxeed.

▪ Waxay kuu iftiiminayaan dariiqa guusha iyo sida loo gaaro.

▪ Waxay kaa caawinayaan inaad dejiso hadaf iyo in aad ka dhabayso ama xaqiijiso hadafkaas.

Buugaagta dhiirigelinta waxaa kamid ah: Fakar oo hodan noqo (Think and Grow rich), Ha isku mashquulin waxyaabaha yaryar(Don't sweat the small stuff), caqli cusub oo kaamil ah (A whole new mind), Eat that frog, The art of happiness, The four agreements.

Buugaagta Taariikhda

Cilmiga Taariikhda waa diraasaynta iyo barashada wixii soo maray dunida si cashar looga barto, taariikhdu waa meelaha ugu badan ee la isugu Faano maanta, umad kasta waxay ku dadaashaa sidii ay u ilaalin lahayd taariikhdeeda, umad aan

taariikhdeeda aqoon waa ummad sii dumaysa, sidaa darteed waa in jiilka soo koraya la baro taariikhdooda, taariikhdu waxaa loo qaybiyaa seddex qaybood oo kala ah: Taariikhda casrigii qadiimka, casrigii dhexe iyo taariikhda casrigan cusub, waa inaad akhridaa taariikhda laga soo bilaabo nabi Aadam calayhi salaam ilaa Qarnigan aan ku jirno, waxaa kaloo habboon inaad si gaar ah u akhrido Taariikhda islaamka iyo tan deegaankaaga.

Taariikhyahannada ugu waaweyn dunida waxaa kamid ah:

▪ Dr Raaghib Alserjaani: Waa qoraa, dhakhtar, taariikhyahan u dhashay dalka Masar, waxaa uu xoogga saaray xadaaradihii soo maray dunida, inta badan buugaagta uu qoray waa afka carabiga, waxaana kamid ah: mowsuucada Taariikhda islaamka, Qisada Tataarka, Qisada wadankii Andalus, Qisada hoggaamiyaha Turkiga Erdogan, Qisada Tuunis, Qisada Suldaan Maxamed Alfaatix, Qisada dowladdii cusmaaniyiinta, waa kuma nabi Muxammad NNKH.

▪Eric Hobsbawm: Waa taariikhyahan Ingiriis ah, waxaa uu qoray dhiganayaal taariikheed ay kamid yihiin: The age of revolution, Industry and Empire, The age of capital, The history of Marxism, Worlds of Labour, The age of empire, On history.

Taariikhda soomaalida: Waxaa jira taariikh badan oo gacan-ku samays ah oo taariikh dhab ah loo haysto, waana sababta aan la isugu hallayn karin inta badan Taariikhda, haddaba waxaan soo xushay 4 taariikhyahan oo aan ku kalsoonahay taariikhdooda, waxaana kamid ah:

▪Dr saadiq Eenow: Waxaa uu leeyahay qormooyin iyo barnaamijyo taariikheed, waxaan kugula talin lahaa inaad dhegaysato barnaamij 6 qaybood ah oo YouTube-ka laga helo cinwaankuna waa Taariikhda Soomaalida Dr saadiq Eenow.

▪ Professor Mohamed Haji Mukhtar: Waxaa uu muddo 30 sano ka badan Taariikhda ka soo dhigay Savannah State University gobolka Georgia ee dalka Maraykanka, waxaa uu leeyahay qormooyin iyo barnaamijyo taariikheed, Bal Akhri " Historical dictionary of somalia".

▪Sheekh Aadan Sheekh siciid: buugaagtiisa ugu caansan waxaa kamid ah Taariikhda magaalada Baardheere, iyo Sooyaalka Gumeysiga soomaaliya oo buug muhiim ah.

▪Dr Aburahman Baadiyow: Buuggiisa "Making sense of somali History" ayaa wax badan kuu bidhaamin doona haddii aad xiisaynayso taariikhda Soomaalida.

Buugaagta siyaasadda

Haddii aad baranayso siyaasadda waxaan kula wadaagayaa buugaagta ugu mudan ee siyaasadda, waxaana kamid ah: Media control, The politics, political ideologies.

Buugaagta juqraafiga

Waa barashada dhulka, muuqaalada dabiiciga ah, iyo dadka ku nool, juqraafiga waa laba nooc, mid waa barashada dadka iyo tirokoobyada, dhaqaalaha, iwm, tan labaad waa juqraafiga Dabiiciga ah, waa diraasaynta hawada sare, biyaha, badaha, iwm.

Buugaagta cilmu-nafsiga (psychology)

Cilmu-nafsiga waa barashada caqliga, habdhaqanka qofka iyo sida uu u fekero, falsafaddii Giriigii hore waxay ku sheegeen in cilmu-nafsiga lagu barto nolosha caqliyeed ee qofka, halka culimada ku takhasusay suluugga ama dhaqanka dadka ay ku qeexeen in cilmu-nafsiga lagu barto habdhaqanka qofka, ka guud ahaan cilmu-nafsigu waa diraasaynta caqliga iyo habdhaqanka qofka.

Buugaagta horumarinta nafta

Waa horumarinta iyo Kobcinta aqoonta iyo garaadka qofka iyo inuu xoogga saaro meelaha uu ku wanaagsanyahay, buugaagta ugu caansan qaybtan waxaa kamid ah: 10 ka fure ee guusha, Toddobada caado ay leeyihiin dadka guuleystay, maaree noloshaada, maaraynta waqtiga, Dhaaf walbahaarka oo bilow nolol cusub, dhamaan buugaagtan waxaad heli kartaa iyaga oo ku qoran Soomaali, Carabi, iyo Ingiriis.

Buugaagta Gabayada

Gabayada waa hanti ay umadi leedahay, taas oo lagu ilaaliyo afka iyo dhaqanka bulsho, gabayada waxay hoostagaan suugaanta ama adabka, luuqadii aad jeceshahay ku baro.

Luuqadaha

Maanta waxaad awood u leedahay inaad af cusub barato adiga oo gurigaaga jooga, farqi weyn ayaa u dhaxeeya qof hal af ku hadla iyo qof dhowr luuqadood yaqaana.

Dhaqaalaha:

Buugaagta dhaqaalaha waxaa lagu bartaa sida loo kobciyo suuqyada iyo shirkadaha, dadka leh hal-abuur ganacsi waxaa lagu taliyaa inay waqti badan

geliyaan buugaagta dhaqaalaha, sidoo kale ardayda baranaysa ganacsiga waa muhiim inay akhriyaan.

Tignoolajiyadda

Dunida maanta waxay u socotaa in tignoolajiyadda heer sare laga gaaro, tignoolajiyaddu waxay kaalin mug leh ka qaadanaysaa koboca dhaqaalaha dal ama qaarad.

Falsafadda

Inta badan falsafaddu waa su'aalo la iska weydiiyo kownka, aqoonta, iyo caqliga,Culimada casrigan falsafaddu waxay u kala qaadaan dhowr qaybood sida:Falaasifadda Giriigii hore, waxaana kamid ah:Pythagoras,Socrates.

Falaasifadda muslimiinta, sida: Alfaaraabi, Ibnu Rushd, ibnul carabi, Al idriisi, iyo faylasuufkii casrigan Dr Mustafa maxmuud Alle ha u naxristee.

Buugaagta caafimaadka

Buugaagta ka hadla arimaha caafimaadka waxay muhiim u yihiin nolosheenna, waxaa laga bartaa cuntooyinka nafaqada leh, cudurada, sida looga hortago, iyo sida loo daweeyo, cilmiga caafimaadka iyo dawooyinka qofkii ugu horeeyay ee daaha ka roga waxa uu ahaa Ibnu siinaa oo wax badan ka qoray caafimaadka.

Sheekooyinka:

Sheekadu waa qormo uu hal abuuro qof si bulshada loo gaarsiiyo wixii muhim ah.Inta badan sheekooyinku ma aha kuwo xaqiiq ahaan u dhacay, balse dadka aftahanka ah ayaa hal abuura.Noocyada sheekooyinka waxaa kamid ah:

▪Sheekooyin taariikhi ah: dhacdo taariikhi ah oo lasoo bandhigo, qoraaga lagu magacaabo Suldaan Nayruus ayaa wax badan ka qoray qaybtan sida : Cuqubo, Godadle, Warsame iyo weriyenimo.

▪Sheekooyin jariimo: waa sheekooyinka dembiyada iyo baarista ah dad aad u badan ayaa akhrista sheekadan, qorayaasha aadka looga jecelyahay sheekadan waxaa kamid ah Agatha Christie oo qortay buugaag Suuqa wada qabsaday waxaana kamid ah: And then there were none, Death on the Nile, Patterns in crime.

Sidoo kale Dr Axmed khaalid Towfiiq ayaa kamid ah qorayaasha, wuxuuna qoray: Maa waraa'a dabiicah, Yuutobiya, rajfatul khowf.

▪Sheekooyinka jacayl iyo Roomansi: buugaagta ugu caansan ee laga qoray waxaa kamid ah: Isle'egi sa seegan, maanafaay, Ruumiyo iyo Juuliyat, Qeys iyo Leyla.

▪Sheekooyinka dhiirigelineed: Waxaa lagu soo bandhigaa sheekadan dhabar-adayga qofka iyo in uu meel sare gaaro.

Sidee wax loo akhriyaa?

Dadka ku nool dunidan waxay isku waafaqsanyihiin ahmiyadda akhrisku leeyahay, sidaa ay tahayna dadka wax akhriya dunida way ku yaryihiin.

Tirokoobyaddii ugu dambeeyay ee dunida laga sameeyay waxay ahayd sidan:

Dalalka Hindiya, Taayland, iyo shiinaha ayaa ugu horreeya wadamada ugu akhriska badan dunida, warbixintu waxay intaas ku dartay in muwaadinka Hindiga ah uu wax akhriyo 10 saac iyo 42 daqiiqo isbuuc kasta.

Dalalka carabta iyo Afrika ayaa la sheegaa in ay aad u hoosayso heerka wax akhris ee bulshada.

Abraham Maslow oo ahaa caalim dhanka cilmu nafsiga oo noolaa intii u dhexaysay (1908-1970) waxa uu sheegay in qof kasta uu u baahanyahay 5 arimood oo kala ah:

1- Baahida cunto, biyo, iyo hoy uu seexdo.

2-Baahida nabadgalyo iyo amaan.

3-Baahida bulsheed, in uu helo asxaab iyo ehel.

4-Baahida ah in la qadariyo lana ixtiraamo.

5-Baahida ah inuu guul ka gaaro nolosha.

Si uu qofku u noqdo akhriste wanaagsan waa in uu baadigoob u galaa helitaanka qaabka uu wax u akhriyo iyo waxa ka caawin kara in uu wax akhriyo.

Haddaba waxaa jira 10 arimood oo kuu sahlaya in aad wax akhrido, waxayna kala yihiin:

1-Deegaan wax akhris: Waa in aad lahaataa goob jawi deggan oo ka caagan buuqa iyo sawaxanka dadka, si maskaxdaada ay xaadir u noqoto.

2-Goob iftiin fiican leh in aad hesho waa muhiim, waxaa lagu taliyaa in iftiin meel dhexaad ah wax lagu akhriyo si loo ilaaliyo caafimaadka indhaha.

3-Samayso waqti kuu gaar ah oo aad wax akhrido maalin kasta, tusaale ahaan afarta galabnimo ilaa shanta galabnimo waxaad ku akhrin kartaa laba buug adiga oo si fiican u dhuuxaya buugga.

4- Samayso buug kuu gaar ah (Notebook) oo aad ku qorto faa'idooyinka buugaagta.

5-Saaxiibo wanaagsan oo kugu dhiirigeliya wax akhrinta waa muhiim, haddii kale ku biir naadiyada akhriska.

6- Ku bilow buugaagta yaryar ee ku qoran luuqad la fahmi karo, buugaagta aad akhrido waa in ay u dhaxaysaa 100-150 bog inta aad bilowga tahay.

7-Ismaqashiinta: Dadka qaar ee akhriya buugaagta waxay doorbidaan in ay cod sare ku akhriyaan buugaagta, balse waxaa ka habboon kana Faham badan marka aad aamusantahay.

8-Bilowga buugga waa in aad akhridaa tusmada buugga, taariikhda qoraaga,waxa uu ku saabsanyahay buugga, iyo horudhaca buugga, taasi waxay kaa saacidayaa in aad fikrad fiican ka haysato buugga.

9- Xulo buug heerkaaga gaarsiisan: marna ha isku mashquulin buugaagta waaweyn ee ka sareeya heerkaaga, waa in aad doorataa buug facaaga ah oo aad dhamayn karto, sidoo kalena aad fahmi karto waxa ku qoran.

10- Ka fogow wax kasta oo mashquul kugu furi kara inta aad ku jirto wax akhrinta, sida moobilka, Raadiyaha, Tvga, iwm.

Dedejinta akhriska/Xawaare Akhriska

Akhrinta la dedejiyo waxay kaa caawinaysaa in aad buugaag badan dhamayso, inta badan akhrinta la dedejiyo waxaa loo adeegsadaa sheekooyinka iyo maqaallada dhaadheer in aad si fudud ku dhamayso.

Haddaba arintan waxay u baahantahay tababar iyo juhdi aan yarayn, waa in aad indhahaaga bartaa Xawaare akhriska.waa inaad wax ku akhridaa luuqad aad ku xeeldheertahay, waa inaad la qabsataa dhaqaaqa indhaha iyo buugga.

Waxaa igu adag in wax akhriska caado ka dhigto, maxaan sameeyaa?

Bal inyar ila soco.

Anigu ma fahmo waxa aan akhriyo.	Waxaad u baahantahay tababar dheeri ah
Xusuustayda way liidataa, ma xusuusan karo wixii aan akhriyay.	Markasta oo ay badato firfircoonida maskaxdaada, fahamka ayaa kuu furmaya.
Anigu mashquulkayga ayaa ka badan buug iyo wax akhris.	10 daqiiqo wax akhri maalintii, inta ka dambaysa waad la qabsan Alle idankii.
Caajis baan dareemaa markasta aan buug soo qaato.	Marka aad jimicsiga ku cusubtahay sidaas baad dareentaa akhriskuna waa sidaas.
Waxaan dareemaa haraad,iyo neefta oo igu adag marka aan wax akhrinayo.	Biyo wanaagsan cab, hawo fiicanna qaado

Akhriska mudada dheer daal baan ka dareemaa.	30 kii daqiiqo ee kasta qaado 3 daqiiqo oo nasasho ah.
Marka aan maqlo moobilkayga oo dhaca buugga xitaa waan illoobaa.	Ka fogoow aalad kasta oo mashquul kugu furi karta.

Maxaa sabab u ah dadka ku guuldarraysta wax akhriska?

Deg-deg iyo fudayd

Xamaasad aan meelna jirin

Kalsooni badan oo ay isku qabaan.

Maxaa dawo u ah?

Allaah talo-saaro marka hore.

Go'aan adag qaado.

Waxa aad akhrinayso yaysan kaa noqon ha lagu arko iyo ha lagu amaano.

Soo qaado qalin iyo warqad, kadibna ku qor buugaagta kuu qorshaysan bishaas.

La xisaabtanka nafta waa muhiim.

Goorta iyo goobta wax lagu akhriyo

Waxaan shaki ku jirin in qof kasta uu awoodo inuu wax akhriyo waqti kasta, balse waxaa la doonayaa waqtiga uu akhristuhu si fiican u dhuuxi karo mucda buugga.

Qof kasta waxaa uu leeyahay saacad dahabi ah sida uu buuggiisa ku qoray Dr Cabdikariim Bakaar, saacadda dahabiga ah waa goorta uu qofku diyaar u yahay inuu fekero, ama wax xifdiyo, waa xilliga maskaxdu ay soo jeedo.

Saacadda dahabiga waxay noqon kartaa aroortii hore, dadka qaarna duhurkii ama galabtii, halka dadka qaar ay saacaddaas u tahay saqda dhexe habeenkii, ka guud ahaan maskaxdu xilliga duhurkii wixii ka bilowda waxqabadkeeda waa uu wanaagsanyahay, sidoo kale aroortii hore si weyn ayaa loo ammaanay.

Goobta aad wax ku akhrinayso waxaa habboon in ay tahay meel dabayl leh.

Waxyaabaha kugu saacidi kara in aad wax akhrido

Waxaa jira laba arimood oo kaa saacidaya in aad si joogto ah wax u akhrido,

Arinta koowaad waa in naftaada ay iska jeclaato akhriska sidaasna ay caado kuugu noqoto, tan labaad waa dadka kugu xeeran, sida naadiyada Akhriska.

Naadiyada Akhriska

Waa koox dad ah oo kulma si ay u akhriyaan buug.

Casrigan maanta la joogo way adagtahay in shakhsi bilow ah uu si fudud u la qabsado akhriska, waxaase suuragal ah in naadiga akhriska uu wax badan ka barto ilaa uu heer sare ka gaaro.

Ujeedka guud ee naadiyada Akhriska waa in si wadajir ah loo akhriyo buugaagta, loona falanqeeye, iyo sidoo kale in fikrado la isweydaarsado.

Faa'idooyinka naadiyada akhriska waxaa kamid ah:

▪Marka uu qof kusoo biiro naadi akhris waxaa uu noqon doonaa akhriste firfircoon islamarkaana dhamayn kara 2,3 ilaa 4 buug muddo cayiman gudaheeda, waxaana u kordhaya aqoon iyo waayo-aragnimo.

▪Maareynta waqtiga ayuu xal u helayaa qofka,akhtistaha waxaa uu ku guuleysanayaa inuu dhameeyo akhrinta buug waqtigii lasoo faray.

▪Xubnaha naadiga Akhriska waxay soo bandhigaan dood-wadaag wax ku ool ah, halkaas waxaa laga helayaa khibrado badan sida: fagaare-ka hadalka, iyo doodaha.

▪Xubin kasta waxaa uu baran doonaa xejinta nafta iyo in la dhegaysto dadka hadlaya, sidoo kale Ixtiraamidda fikradaha dadka kale, waana qodobada u gaarka ah dadka guuleystay.

Sida loo aasaaso naadi akhris

Naadiyada Akhriska waxay ku bilowdaan fikrado iyo aragtiyo la isku biiriyay, balse waqti fog masii jiri karo naadiga haddii aan la helin han iyo himilo fog.

Inta badan dhulka soomaalida waxaa ka jiro naadiyo akhris aad u badan, haddii laga dhabayn lahaa ujeedka loo aasaasay naadiga waxaa la heli lahaa dhalin badan oo wax akhrisa.

Naadiga Akhriska waa madal ay si wadajir ah u samaysteen dadka jecel Akhriska.

Shaqada naadigu waa in la samaysto fadhiyo gaar ah si loogu ballamo buug, todobaadkiiba halmar ayay is arki karaan si ay uga doodaan buuggii lagu heshiiyay su'aalo na la iska weydiiyo nuxurka guud ee buugga.

Tirada xubnaha naadiga akhriska waa 3 ilaa 15 qof, fadhiyada naadiga Akhriska waa inuu noqdaa 2 saac ama saacad iyo bar si wax badan loo falanqeeyo.

Guddoonka guud ee naadiga ayaa go'aamin kara waqtiyada la kulmayo iyo fasaxyada isaga oo la tashanaya kuxigeenkiisa, sidoo kale waa inuu jiraa xiriiriye ugaar ah kulamada kaas oo su'aalaha weydiinaya Xubnaha naadiga islamarkaana u qaybinaya doodaha.

Naadiyada Akhriska inta badan waxay ku kulmaan goobaha waxbarashada, hoolalka, iyo goobaha dalxiiska ee quruxda badan.

Doorashada buugaagta la soo akhrin doono waxaa talo ku leh dhammaan xubnaha naadiga, waa in loo bandhigaa buugga la akhrin doono iyo sababta ay ku doorteen.

Naadiyada Akhriska inta badan waxay ka dhisanyihiin magaalooyinka waaweyn ee dalka, waana wax lagu farxo in magaalo kasta ay ka jiraan ugu yaraan 2 ama 3 naadi.

Si loo helo naadi waxqabad leh waa in madax looga dhigaa qof wax ka yaqaana hoggaaminta, waa inuu ahaadaa qof furfuran oo firfircoon.

Buugaagta la dhegaysto (Podcasts)

Waxaan ahay qof aad u daneeya wax akhriska balse waqti uma helo in aan wax akhriyo mashquulkayga oo aad u badan darteed !

Waxaan aad u xiiseeyaa in aan buugaag badan dhameeyo bil kasta, balse waan ka caajisaa in aan buug dhameeyo buug kasta kala bar ayaan ku hakiyaa! Maxaa xal ah?

Xalkaaga halkan ayaad ka helaysaa Alle idankiis.

Wax Akhrisku wuxuu si weyn u saameeyaa nolosheenna, wuxuu kobciyaa awoodeenna caqliyeed iyo mid luuqadeed, sidoo kale in aad si caqliyeysan uga gudubto mashaakilka ka jira dunida,

Wax Akhrisku waxaynu ka baranaa wax aanan horay u aqoon, inta aan ku gudajirno akhrinta buugaagta waxaynu u safarnaa meelo kala duwan, waxaan la kulannaa dad kala duwan,

Wax Akhrisku waa soo koobidda tijaabooyin ay sameeyeen dad horay u soo noolaa si aan uga faa'idaysano khibradahooda.

Buug kasta oo aad akhrido noloshaada ayuu wax ku kordhiyaa.

Waxaa jira laba qaab oo ay adeegsadaan dadka buugaagta akhriya, waxayna kala yihiin:

▪Akhrinta buug adiga oo gacanta ku haya buugga ama kombiyuutarka aad ka akhrido, waa habka ugu wanaagsan ee laga helo faa'idooyinka buugaagta.

▪Dhegeysiga buug la duubay(Podcast), waxaa loo isticmaalaa in aad dhegaysato buug ama sheeko faneed(Novel).

Xilliyada aad saarantahay baska, diyaaradda, iyo gaarigaaga,

Inta aad u socoto goobtaada shaqo, ama waxbarasho waxay kugu qaadanaysaa 20-30 daqiiqo oo aad ku dhegaysan karto buug, bil kasta waxaad dhamayn kartaa intaas oo buug.

Dhegaysiga noocyada kala duwan ee buugaagta waxay kobcinayaan garaadka bulshada, sidoo kale waxaa laga dhaxlaa caafimaad maskaxeed.

10 faa'ido oo laga helo buugaagta duubban

1- Dhegaysiga sheekooyinka waxaa laga helaa dareen deganaansho iyo nasasho leh:Dad badan ayaa tijaabiyay arrintan, waxay ku soo xusuustaan xilligii caruurnimo ee waalidiinteenna nooga sheekayn jireen sheeko xariirta, xilligaasi caruurnimo habeen kasta waxaan dareemi jirnay farxad.

2- Qisooyinka waxay naga dhigaan kuwo fahamsan dunida:

Qisooyinka waa dhacdooyin soo maray dunida oo dhab ahaan u dhacay,

Qisooyinka waxaa la soo minguurinayay fac ka fac, qorayaasha Sheekooyinkooda la xiiseeyo waxaa kamid Shakespeare,Qisooyinka waxaa loo adeegsadaa in lagu xaliyo mushkilado taagan.

3- Codku waxaa loo adeegsadaa dareenno kala duwan:

Sababaha nagu dhiirigeliya buugaagta la dhegaysto waxaa kamid in xilliyada qaar ay nagu adkaato fahamka qoraallada buugaagta,

Balse waxaa iska fudud in aan muddo fog wax dhegaysano innaga oo aan caajis dareemin.

4- Codku wuxuu naga caawiyaa in aan ka takhalusno fikradaha aan wanaagsanayn(Negative thinking):

Waxyaalaha nagu caawiya dhegaysiga buugaagta waxaa kamid inaan jawi xasiloon ku noolaano, dadka bilowga ah ee akhrista buugaagta waxay caqabad weyn kala kulmaan in ay jawiga wax akhriska la qabsadaan, balse Codku wuxuu kusiinayaa inaad si fudud u dhuuxdo waxa uu ka sheekaynayo buugga.

5- Codku wuxuu la dagaalamaa walbahaarka iyo cadaadiska:

Maanta kadib walbahaarka ha kaa haro, la soo deg buugaagga kuugu fiican, maanta buugaagta waxaa loo isticmaalaa in lagu daweeyo xanuunada nafsiga ah,

Jonathan Roberts wuxuu leeyahay:

Buugaagta la dhegaysto waxay iigu jiraan booska maareynta xanaaqa, maanta waxaan ku dhegaystaa tareennada, diyaaradaha, basaska, intii aan murugo ka fekeri lahaa.

6- Dhegaysiga buugaagta waxay awood kuu siinaysaa in aad barato goobo cusub iyo dad cusub.

7- Codku wuxuu noqon karaa mid ku soo jiita, dadka sheekooyinka ama buugaagta codadkooda ku duuba qaarkood waxay jawi fiican geliyaan dadka dhegaysta.

8- Buugaagta la dhegaysto waxay xoojiyaan maareynta waqtiga:

Dadka da' ahaan horay u baxay waxaa lagula taliyaa in ay badiyaan dhegaysiga buugaagta, sidoo kale dadka xanuunada qaar qaba ee xiiseeya wax akhrinta waa in ay ku dadaalaan buugaagta la dhegaysto.

10- Dhegaysiga buugaagta kaagama baahna dadaal dheer:

In la dhegaysto buugaagta waxaa lagu tiriyaa arrin iska fudud, waxaad kala soo degi kartaa oo aad ku dhegaysan kartaa moobilkaaga, kombiyuutarkaaga, ama mp3, sidaa darteed haddii aad meel u safrayso uma baahnid in aad qaadato buugaag badan.

Haddii aanad horay u tijaabin buugaagta la dhegaysto ku bilow tallaabooyinkan:

▪ Dhegayso buug ku cajab geliyay ama sheeko yar, ama buug uu qoray qoraa aad xiisayso buugaagtiisa.

Buugaagta la dhegaysto waxaad ka helaysaa barnaamijyo laga helo plastore-ka sida: Google podcast, Spotify, overcast, pocket cast, castro, cast box, podcast Addict.

Waxaa intaas ka fudud YouTube-ka, haddii aad English-ka wax ku akhrido ku qor Audiobooks, haddii aad ku fiicantahay carabiga waxaad ku qortaa

الكتب المسموعة

Kadibna lasoo deg cod ahaanna u dhegayso marka aad u socoto Suuqa, goobta ganacsi, ama waxbarashada. Sidoo kale sheeko faneedyada Afsoomaaliga waa la heli karaa.

Buuggii ugu horeeyay ee Afsoomaali ah oo aan dhegaysi ku dhameeyay wuxuu ahaa mashruucii la dagaalanka nuurka oo kamid ah buugaagta sida weyn looga xiiseeyo gayiga soomaalida.

Caruurta iyo Akhriska

Ubadku waa ubaxa guriga wixii lagu barbaariyo ayay ku koraan kuna weynaadaan, maadaama aan isla garanay Ahmiyadda Akhriska waxaa habboon in ubadkeenna aan ku tarbiyeyno akhriska.

Ilmaha marka ay soo gaaraan lix sano waa marka uu yeelanayo wax uu jeceshahay iyo wax uu necebyahay, sidaas darteed waa in waqtigaasi la jeclaysiiyaa akhriska si ay caado uga dhigtaan.

Caruurta akhriska badan waa kuwo waxbarashada ku wanaagsan, waa kuwa ugu dadaalka badan uguna firfircoon dugsiga.

Ilmaha inuu akhriska jeclaado waxay u furaysaa irdo badan sida in ay korto maskaxdiisa.

Waalidiinta waa in ay dareemaan in ubadkooda ay leeyihiin awood ay waxbadan ku bartaan.

Caruurta da'doodu inta aysan gaarin 6 sano waxaa qurux badan in sheekooyin badan looga sheekeeyo, gaar ahaan sheeko xariirta khiyaaliga ah oo maskaxdiisa korinaysa xikmado badanna wuu ka faa'idi,sidoo kale sheekooyinka qosolka leh waxay caruurta ka ilaaliyaan cabsida iyo welwelka faraha badan.

Deegaan wax akhris waa in la helaa, guriga waxaa fiican in laga helo maktabad ama xitaa buugaag, caruurta hortoodana wax lagu akhriyo sidoo kale looga sheekeeyo dadkii wax akhrin jiray guulihii ay gaareen si ay dhiirigelin ugu noqoto.

Hooyadu waa barbaariyaha caruurta, ilmaha inta badan wuxuu ku daydaa dhaqan ahaan hooyadiisa, hadalka, ficilka, dabeecadda.

Ka warran haddii ay hooyadu mashquul ku tahay tv-ga, ama hadal wanaagsanba aysan ku hadlin, buug iska daaye qoraal yar xitaa dulqaad ku akhrido aysan lahayn, dabcan waxaad sugaysaa ubad dhaqankeeda, dabeecaddeeda leh iyo inuu tv-ga hor-fadhiyo toban saacadood.

Dugsiga wuxuu saamayn ballaaran ku leeyahay caruurta yaryar, hab-fikirkooda, dhaqankooda, iyo xitaa wax akhriskooda.

Waxyaabaha akhriska ku dhiirigeliya caruurta waxaa kamid ah:

▪Daryeel iyo ka warqab joogto ah.

▪ In caruurta iyo waalidka si wadajir ah wax u akhriyaan.

▪Abaalmarin dhiirigelineed, in caruurta qofkii hal buug dhameeya la siiyo abaalmarin.

▪In Hadiyad ahaan loogu keeno buugaag, sheekooyin, iwm.

▪Hooyadu waa inaysan ka fogaan buugaagta si ilmaha yar u dareemo qiimaha buugga.

Ugu dambayn haddii la helo jiil wax akhriska caado u ah waxaan shaki ku jirin in dad badan oo fekera ay soo bixi doonaan, balse haddii wali lagu mashquulsanyahay YouTube iyo prank waxaa soo bixi kara jiil aan mas'uuliyad iska saarin dalka.

Akhriska nolol-maalmeed ka dhigo

Aroor kasta waad soo kacdaa,waxaad cuntaa cunno kala duwan, waxaad cabtaa biyo, waad socotaa, waad neefsataa, waad hadashaa, oo waad nooshahay, ka waran haddii dhowr maalmood oo xiriir ah aadan wax cunin waxna cabin, dabcan waad tabardarsanaysaa, oo Xaalad adag baad galaysaa.

Haddii aad leedahay aqoon waxaad u baahantahay inaad maalin kasta cusboonaysiin ku samayso, inaad maalin kasta wax akhrido waxay ka dhigantahay inaad maalin kasta wax cusub baranayso.

Samayso jadwal bileed aad ku akhrinayso buugaag.

Tusaale: Bishii waxaad akhrin kartaa haddii aad bilow tahay ugu yaraan seddex buug oo yaryar, bishii waa 30 maalmood, buugga aad akhrinayso waa 150-200 oo bog, maalin kasta waxaad akhrin kartaa 10 bog.

Waxaa jirta laba qaab oo loo adeegsado akhrinta nidaamsan, waxayna kala yihiin:

▪In bishii la qorshaysto 3 buug, isbuuc kasta hal buug la dhameeyo, waa 3 isbuuc, halka isbuuca 4aad ee soo haray falanqayn iyo soo koobid lagu sameeyo buugaagtii la akhriyay.

▪In bishii la qorshaysto 3 buug, maalin kastana si wadajir ah loo akhriyo seddexda buug, buug kastana laga akhriyo 10 bog, nidaamkan dambe dadka Akhriska ku cusub kuma fiicna sababtoo ah way adagtahay in si joogto ah loogu dhaqmo.

Go'aanada ugu badan iyo qorshooyinka aad dejisay waa inaad ka mirodhalisaa.

Akhriska noloshayda muxuu ka badalay?

Qoraa carbeed oo lagu magacaabo Axmed shaqiiri waxaa uu qoray buug uu kaga waramayo hayaankiisa nololeed, waxaa uu si faahfaahsan uga sheekaynayaa muddo safar uu ku tagay meel jasiirad ah oo aan cidna joogin, muddada uu halkaas ku sugnaa waxaa uu ka soo tagay dhammaan wixii mashquul ku furi lahaa, wuxuu horay u sii qaatay kitaabka Qur'aanka iyo dhowr buug oo kale.

Muddada uu jasiiraddaasi ku sugnaa wuxuu isku dayay inuu wax ka badalo noloshiisa, inuu isweydiiso nimcooyinka Alle intee baan ka faa'idaystay? Iyo inuu naftiisa la hadlo.

Qormadiisa wuxuu ku bilaabay:

"Buugaagta waxay kaalin weyn ka qaateen in noloshayda ay hagaagto, mana qiyaasi karo aniga oo 42 jir ah haddii buugaagtan wax ka badalay fikirkayga aysan ahaan lahayn sida xaalkaygu noqon karay", waxaa uu qoraagu soo qaadanayaa afartan buug oo noloshiisa wax ka badalay, waa buugaag gebi ahaanba bedelay geeddi-socodka noloshayda ayuu yiri.

Haddaba dhowr ayaan kusoo koobayaa waxyaabaha akhriska laga dhaxlo.

▪Cilmi waxtar leh: waxa ugu muhiimsan ee Akhriska laga helo waa aqoon dheeri ah.

▪Go'aan qaadasho: Aadanaha markasta wuxuu la kulmaa dhacdooyin badan qaarkood fursado ah qaarka kalena caqabado ah, haddaba qofka akhriya buugaagta marna kuma dagdago go'aan qaadashada, balse waxaa uu ku fekeraa go'aano badan, wuxuuna ka doortaa kan ugu macquulsan, waxaa uu kasii fekeraa waxa ka dhalan kara go'aanka.

▪Dhaqangelinta wixii aad baratay: Waxaa jira fikrado badan oo kugu soo dhaca, balse Dhaqangelinta fikradahaas way kugu adagtahay, buugaagtu waxay kaa saacidayaan inaad dhaqangeliso go'aanadii aad qaadatay.

▪Dabeecadda qofka ayaa wax badan iska badalaya, inta badan dadka akhristayaasha ahi waa dad deggan dabeecad ahaan, la dhaqanka dadka kalena way ku fiicanyihiin.

▪Wixii ay barteen waxay sii gaarsiiyaan dadka kale, haddii aad umadda wax ku dhaanto fadlan la wadaag oo ha la dhiman cilmiga iyo fikirka kugu jira laga yaabee in tarantaada dambe ay ka faa'idaan.

▪Akhristayaasha Wanaagsan waa hadal-yaqaano,, marka lagu casuumo xaflad ama goob kale inta badan waxay ku hadaan hadallo soo jiidasho leh oo asluubaysan.

▪Isdhuldhigid(Tawaaduc): Markaad waxbadan barato kama dhigna inaad dadka kale ka Sarayso, waxaa laga yaabaa in dadka kale meelaha qaar ay kaaga fiicanyihiin, markasta u la dhaqan dadka si qadarin iyo ixtiraam leh, marna yaysan kaa dhaadhicin inaad dadka kale wax dheertahay.

▪Marna kuma mashquulaan amaanta ama cayda dadka kale uga imanaysa, waxaa jirta xikmad carbeed oo leh" Cidna haka sugin mahadcelin" waxaad qabanayso wanaag iyo samofal u qabo Alle dartiis, sidoo kale in la iska indhatiro hadallada dadka qaar waa arin meesha ku jirta, haddii aad la doodo doqon dadku waxay ku wareeraan kiina doqonka ah.

Goobaha laga helo buugaagta

Buugaagta Waxaa laga helaa maktabadaha, dugsiyada, jaamacadaha, suuqyada, iyo guryaha.

Waxaa kaloo casrigan soo kordhay buugaagta Elektarooniga ah ama buugaagta lagu akhristo kombiyuutarka, iyo moobilka, waa casri wax kasta la fududeeyay.

Waxaa jira barnaamij la dhaho PDF oo lagu akhriyo buugaagta Elektarooniga ah, waxaa markii ugu horaysay soo saaray Barnaamijkan John Warnock oo

Maraykanka u dhashay, Shabakadda Google waxaad kala soo degi kartaa malaayiin buug oo ku qoran afaf kala duwan, haddaba Tusaale yar ayaan ka qaadanaynaa qaabka buugaagta loo la soo dego.

Waxaa jira maktabado badan oo laga soo degsado buugaagta waxaa kamid ah Z library.

Si aad u degsato buug Pdf ah raac tilmaamahan:

1- Marka hore gal barnaamijka Chrome oo moobilkaaga ku jira.

2- kadib ku qor Z library oo taabo search.

3- Kadib toos u gal linkiga buluugga ah ee laga galo maktabadda.

4- Haatan waxaa kuu soo baxay seddex qodob oo kala ah Books, Articles, iyo Sign in.

5- Taabo halka ay ku qorantahay Books.

6- Waxaad arkaysaa meel at ku qorantahay Search for title, halkaas ku qor magaca buugga aad doonayso inaad soo degsato, kadibna riix calaamadda search.

7- Waxaad arkaysaa buugaag tiro badan, ka dooro buugga aad dalbatay oo riix dushiisa.

8 Ugu dambayn qaybta hoose ee ku qoran Download taabo, Waad lasoo degtay buugga.

Maktabadaha carabiga waxaa kamid ah Foula book, haddaba iga hoo tusaale.

1- Ugh horayn Chrome-ka gal kuna qor Foula book kadibna taabo search.

2- kadib toos u gal barta Foula book oo taabo qoraalka buluugga ah ee ku dulqoran.

3- Kadib buuggii ku anfaca ka dooro ama ka raadso.

4- Kadib taabo halka ay ku qorantahay Taxmiil.

Muhiimadu ma ahan inaad buugaag badan lasoo degto ama soo iibsato, waxaase muhiim ah inaad akhrido oo garato micnaha uu xambaarsanyahay buugga.

Waxaa kaloo lagu taliyaa in qofku uu akhriyo buugaag kala nooc ah, haday noqoto diinta, Taariikhda, dhaqaalaha, cilmu nafsiga, sheekooyinka, balse haddii aad isku koobto hal nooc oo buugaag ah way adagtahay inaad macluumaad badan hesho.

Waa muhiim inaad dadka la wadaagto buugaagta aad akhriday iyo wixii aad ka faa'iday.

Balanteennu waa dhalinyaro wax akhrinaysa, kuna baratamaysa aqoonta iyo waxbarashada.

Maxaa laga yiri Akhriska?

Faylasuufkii faransiiska ahaa ee Voltaire oo noolaa intii u dhexaysay(1694-1778) waxaa maalin la weydiiyay su'aal ahayd

Yaa hogaamin doona insaanka?

Wuxuu ku jawaabay kuwa yaqaana sida wax loo akhriyo.

Akhrisku waa furaha ugu weyn aqoonta ee casrigan, waana halka ay ummadaha ku kala horumareen.

Muxammad muusaa Al-shariif

Haddii xilligii miyiga ninba ninka ka gabay fiican uu ka aftahansanaa dadka kale, maanta ninba ninka ka akhris iyo ogaal badanyahay ayuu ka aftahansanyahay kana aqoon roonyahay.

Aadan Sahan.

Haddii dadku aanay wax qorin waxna akhrin, waxaa fududaanaysa in dadkaas la gumeysto.

Sheekh mustafe xaaji ismaaciil.

Inaad akhrido hal ama labo buug bil ama sanad uun lama rabo, balse waa inaad Akhriska ku dartaa nolol-maalmeedkaaga, maalinna aysan ku dhaafin adigoon wax akhrin. Dr Raaghib Alserjaani.

Waxaa habboon inaad hadda wax akhrido ama caado ka dhigato Akhriska , waxaa la gaari doonaa waqti aad garan doonto faa'idada dhaqankan.. Anton Chekov.

Qof aan wax akhrin wuxuu ku noolyahay hal qaab xitaa haddii uu 70 gaaro, balse qofka wax akhriya noloshiisa waxay u dhigantaa shan kun oo sano, Akhrisku waligiisa wuu jirayaa.....Umberto Eco.

Dhammaad

Taariikhda Qoraaga

Cabdiraxmaan Yoonis Caqiil waxaa uu ku dhashay magaalada Baydhabo ee gobolka Baay, wuxuuna kamid yahay da'yartii kusoo barbaartay waxna ka baratay dalka, wuxuu wax ka qoraa arimaha bulshada sida: dhalinyarada, waxbarashada, caafimaad ka, afafka, iyo Taariikhda.

Tixraacyo

القراءة الذكية..... د.ساجد العبدلي
فن القراءة..... مؤمن قريش
طفل يقرأ..... د. عبد الكريم بكار
كيف تجعل القراءة جزءا من حياتك..... ساجد العبدلي
أربعون..... احمد الشقيري
العلم وبناء الامم..... د.راغب السرجاني

How to read a book. Mortimer J. Adler.

Advanced reading power: Beatrice S.MikuleckyLinda Jeffrie

Akhri oo qor 2 muxaadaro..... Sh mustafe xaaji.

Tabaha Akhriska 2 barnaamij ..... Aadan Sahan.

Maqaallo aan ku qoray bartayda Facebook Abdurrahman Caqiil

Barta Mowdoo.

Barta Wikipedia qaybaheeda carabiga iyo ingiriiska.

Waxaan soo dhawaynaynaa fikradihiina iyo talooyinkiina, farxad bay noo tahay inaan maqalno aaraa'diina, wixii talo iyo tusaale noogu soo dir:

Email: AbdurrahmanCaqiil@gmail.com

Facebook: Abdurrahman Caqiil